

### **Waraqda Mahadnaqa**

*Inaga oo ka mahadnaqna dhammaan waxyaabaha fiican ee ka jira nolosheena waxay kordhin kartaa farxaddeena oo yareyn kartaa giigsanaanteena. Ka shaqee aag kasta oo ah noloshadaa (hoos ku qoran) oo qor waxa ad ka mahadnaqaysid.*

### **Barakooyinka Laga Dul Boodo:**

Ma og tahay in dad dhan 2.4 bilyan oo adduunka ku nool – saddexdii hal qof – aanuu lahayn musqul ku filan? Iyo, in dad dhan 663 milyuun oo qof oo dunida ku nool – tobankii hal qof – aanay haysan biyo nadiif ah? Wax aanad haysan oo ad heshid ma abuurto farxad, laakiin waxa abuura waxa ad hore u haysatay oo ad ka mahadnaqdid. Waa kuwee barakooyinka laga dul boodo ee ad haysatid ee ay tahay inad hadda ka mahadnaqdid?

---

---

---

---

---

---

### **Waxyaabo fiican oo ku saabsan caafimaadkayga iyo jidhkayga:**

Waa muhiim inaynu ku dhex jirno waxyaabaha aynu ka mahadnaqayno. Naftaada oo ad xidhiidh fiican la lahaatid waxay kaa caawin doontaa inad xidhiidh caafimaad qaba la yeelatid dadka kale. Waa maxay waxyaabaha ad ka mahadnaqaysid ee ku saabsan naftaada?

---

---

---

---

---

---

**Firfircoonida an ku istareexo:**

Ha ahaato diyaarinta cunto, adiga oo joogsada si ad u daawatid qorraxdhaca, ama saaxiib ad u sheegtid warakaaga fiican—fikraddu waxa weeye inad u joogsatid, qaadatid oo ku istareexdid dhacdada. Maxaa kaa caawiya inad ku istareexdid wakhtiga hadda adiga oo aan ku fikirin wax kale?

---

---

---

---

---

---

**Xidhiidhyada an ka mahadnaqo:**

Inkasta oo anfacyada dhabta ah ee saaxiibtinimada aan la cabbiri karin (sidee baad u xisaabin kartaa inta ay leeg tahay farxadda u kuu keenay saaxiibkaaga ugu fiican muddo sannado ah?), daraasado isdaba jooga ayaa muujiyay in saaxiibtinimadu ay sare u qaado farxaddeena iyo xiitaa caafimaadkeena. Ayo aad ka mahadnaqaysaa oo ku jira noloshada?

---

---

---

---

---

---

**Ka-dib marka ad buuxisid waraaqda shaqeynta, qaad tallaabada labaad oo ku dhaqan wixii ad ka baratay mahadnaqa inta ad waraaq mahadnaq ah u qortid qof ad daneynaysid.**

Ku fikir qof saameyn fiican ku yeeshay noloshada. Kani wuxu noqon karaa qof ka tirsan qoyska, macallin ama saaxiib ama qof kale. Hab weyn oo lagu muujiyo mahadnaqaaga waa adiga oo qofkaas u qora waraaq ku saabsan taageerooda, naxariistooda, hagistooda, iwm. oo ku tashatid inad u dirtid ama u akhrigid waraaqda gudaha 48-ka saacadood ee soo socda. Dedaalkaaga ugu fiican samee si ad waraaqda gacanta ugu qortid oo aanad ka dhigin qoraal ad teebgareysid ama iimayl.